## MatchingYu, Sidey _u _shaqeeyso

Matching Yu Association (MY) waa urur faaido doon ahayn, leh hogaan mutadawicnimo ah,oo ku tiirsan deeq-bixiyeyaasha.Ujeedadu waa in la isku keeno qolooyinka ka socdo wadamada dhaqaala ahaan liita iyo kuwa ka socdo wadamada dhaqaalaha xogan leh.MY qeyb kama aha arrintan, waa barxada xiriirka ugu horeeya iyada oo aan wax waajib ah la socon. Isticmaalka barxada MY waa bilaash.

Khubarad takhasuska leh,shirkadaha yar yar iyo kuwa bilowga ah waxeey barxada u isticmaali karaan ineey isasoo bandhigaan ,ama cosadaan nooc walba oo shaqo ama iskaashi ah.

Iskaashigu wuxuu shirkadaha uga micneesanyahay kafaalo-qaadid,taageero dhanka farsamada,taageero dhanka galitaanka suuqyada,dhoofinta shaqooyinka iyo tababaro shaqo iwm. Shakhsiyaadkana waxay ku xirantahay haday rabaan in eey ka shaqeeyaan dalkooda ama dibada ,tababar shaqo,ka shaqeynta guriga,ama nooc kasto oo qandaraas shaqo ah oo ku meel gaar ama joogto ah,iwm.

Wax kharash ah oo ku saabsan adeega shaqa raadinta ma jiro,hadii uu jirana aad baa hoos loogu dhigi doonaa.Dakhliga waxaa loo isticmaalaa oo kaliya dayactirka shabakada MY.Hadii eey dhacdo in shakhsiyaadka ama shirkadaha eey codsadaan adeeg ilalin iyo shaqa-raadin oo eey u fuliso Matching Yu,kharashaadka waxaa lagu yeelanaayaa shirkada arrintan daneeneyso. Si kastaba ha noqotee adeegan weli lama hayo,u leexo ururada ganacsi ee bixiyo adeega shaqa raadinta.

## Codsiga

Nidaamka codsiga dhanka websiteka waa otomaatig.Diiwaangelinta ka dib astaan ama brofayl ayaa la sameeyn,taasoo la daabici doono kadib MY markeey ansixiso. Shirkadaha ama shakhsiyaadka dalab gudbiya waxaa si fudud looga heli karaa liisaska raadinta oo leh kala soocid ku tiirsan qeybaha la doortay.

Kaliya astaanta ama brofeylka oo xambaarsan xogta ugu muhiimsan(magaca/jinsiga/sawirka) ayaa ka muuqaneysa liiska raadinta . Soo-booqdayaasha MY waxay heli karaan dhamaan liisaska raadinta, helitaanka astaamaha oo dhameystiran laakiin

waxaa loogu talagalay oo kaliya shirkadaha iyo ururada diiwaangashan.

Codsaduhu haduu yahay shirkad ama shirkad bilow ah,MY waxay kula talineysaa in horaan la adeegsado la-talin xirfadeed(wakiil/dexdhexaadiye). Magaca iyo cinwaanka codsadaha/shirkada waxaa bixin kara/bixin doona oo kaliya codsadaha/shirkada laftigeeda.

Codsadayaasha (shaqsiyaadka ama shirkadaha) waxay dooranaayaan in eey shirkadaha eey xiiseynayaan u ogolaadaan helitaanka astaamohooda ,ama in eey ogolaanshaha bixiyaan hadii laga codasdo. Xiriirada ugu horeeyo ee shirkadaha codsadaha xiiseynaayo waxay mar walba ka dhacaayaan websaydhka MY.

Matching Yu waxay dhaqangelisaa xeerar adag oo ku saabsan siraha.Nuqul ka sameynta ama daabicida feylasha shaqsiyaadka ama shirkadaha ,sida u isticmaalka ganacsi ee xogahan lama ogola waxayna u horseedi joojinta xubninimada sida ugu dakhiyaha badan.